BAYAANKA QIRAALKA MACLUUMAADKA TALLAALKA

# Tallaalka Busbuska/Furuqa Daanyeerka (JYNNEOS™): *Waxyaabaha aad u Baahan Tahay Inaad Ogaato*

Many Vaccine Information Statements are available in Somali and other languages. See www.immunize.org/vis

Bayaanno Macluumaad Tallaal oo farabadan ayaa lagu heli karaa Af-Soomaaliga iyo luqado kaleba. Booqo www.immunize.org/vis

## 1. Maxaa la isu tallaalayaa?

**Tallaalka busbuska/furuqa daanyeerku (JYNNEOS™)** wuxuu gacan ka geysan karaa kahortagga busbuska, furuqa daanyeerka iyo cudurada kale ee uu keeno fayraska loo yaqaan orthopoxviruses, kuwaasoo uu ku jiro fayraska vaccinia.

Busbuska waa cudur khatar ah oo uu keeno fayraska loo yaqaan variola. Dadka qaarkood waxay weli khatar ugu sii jiraan inuu ku dhaco fayraska keena busbuska, kuwaasoo ay ku jiraan dadka ka shaqeeya diyaargarowga xaaladaha deg-degga ah iyo qaar ka mid ah shaqaalaha shaybaarada. Fayrasku wuxuu ku faafi kara min shakhsi ilaa shakhsi kale, kaasoo keeni kara astaamo ay ka mid yihiin qandho iyo finan kasoo baxa maqaarka. Qaar badan oo dadka ka mid ahi way kasoo bogsadaan cudurka busbuska, hase ahaatee qiyaaastii 10kii qofba 3 ka mid ah ayaa u dhinta cudurka.

Furuqa daanyeerku waa cudur naadir ah kaasoo leh astaamo la mid ah kuwa furuqa hase ahaatee astaamihiisu way ka khafiifsan yihiin kuwa lagu yaqaan busbuska. Haddana sidaasoo ay tahay, busbuska daanyeerku wuxuu sababi karaa dhimasho. Busbuska daanyeerku waa caabuq infakshin ah kaasoo shaac-baxaya qaaradda Afrika iyadoo qaar ka mid ah kiisaska ay mararka qaarkood ka dilaacaan wadamo kale, kuwaasoo uu ku jiro dalka Mareykanku.

Fayraska vaccinia ayaa keeni kara cudurka marka ay dadku la kulmaan qof qaba caabuqa infakshinka (sida la kulmitaanka qof waqti dhow qaatay tallaalka loo yaqaan ACAM2000®, kaasoo ah nooc kale oo ka mid ah tallaalka busbuska) ama xayawaano qaba caabuqa infakshinka. Waxaa dhici karta in si aan ku talo-gal ahayn ay fayraska ula kulmaan dadka ka shaqeeya shaybaarada ee ku hawlan tallaalitaanka fayraska, kadibna haddii uu fayrasku ku dhaco, waxaa suurtagal ah inay xanuunsadaan. Haddana sidaasoo ay tahay, inta badan caabuqyada fayraska vaccinia iskood ayey isu xalliyaan iyadoo aan loo qaadanin wax daaweyn ah.

## 2. Tallaalka busbuska/furuqa daanyeerka (JYNNEOS™)

Tallaalka busbuska/furuqa daanyeerka (JYNNEOS™) waxaa la sameeyey iyadoo la isticmaalayo fayraska vaccinia oo nool oo daciif ah mana keeni karo busbuska, furuqa daanyeerka, ama cudur kale oo faafa.

JYNNEOS™ waxa ansixisay laanta qaabbilsan Maareynta Cuntada iyo Daawada ee loo yaqaan FDA (Food and Drug Administration) si looga hortago cudurka busbuska iyo furuqa daanbeerka ee ku dhaca **dadka qaan-gaarka ah ee ay da'doodu tahay 18 sano jir ama wixii ka weyn kuwaasoo khatar weyn ugu jira inuu ku dhaco caabuqa infakshinka ee busbuska ama furuqa daanyeerka**.

- Xarumaha Xakameynta iyo Kahortagga Cudurada ee CDC waxay ku talinayaan in tallaalka JYNNEOS™ ay qaataan shaqaalaha shaybaarada iyo xubnaha kooxda qaabbilsan xaaladaha deg-degga ah ee laga yaabo inay la kulmaan fayrasyada keena caabuq caabuqa infakshinka ee loo yaqaan orthopoxvirus.
- Xarumaha Xakameynta iyo Kahortagga Cudurada ee CDC waxay ku talinayaan in tallaalka ay qaataan dadka bixiya ACAM2000®, ama kuwa daryeela bukaanada qaba caabuqa infakshinka ee loo yaqaan orthopoxviruses.

Sida caadiga ah tallaalka JYNNEOS™ waxaa loo bixiyaa qaab taxane 2 irbadood ah, oo ay u dhaxayo 4 todobaad. Dadka qaatay tallaalka busbuska mar hore waxa dhici karta inay u baahan yihiin 1 marqaadasho oo kaliya.

Marqaadashooyinka xoojinta ah waxa lagu taliyaa in la qaato 2 ama 10 sano kasta haddii qofku ku jiro halis joogto ah inuu la kulmo busbus, furuqa daanyeerka, ama fayrasyada orthopoxvirus oo kale. Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah.

## 3. La hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka

U sheeg bixiyahaaga tallaalka haddii uu qofka qaadanaya tallaalka uu:

- Horey u qabay **dareen-celin xasaasiyadeed kadib markii uu qaatay garoojo daawo hore ee tallaalka busbuska**, ama haddii uu lahaa wax **xasaasiyado daran, oo nolosha halis galin kara**
- Leeyahay **habdhiska difaaca jirka oo daciifay**
- Jiro uur ama loo maleynayo inuu qofku leeyahay **uur** ama haddii uu **ilmo yar naaska nuujinayo**

Mararka qaarkood, bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa laga yaabaa inuu dib kuugu dhigo qaadashada tallaalka busbuska/furuqa daanyeerka ee JYNNEOS™ ilaa inta laga gaarayo booqashadaada mustaqbalka ee soo socota.

U.S. Department of Health and Human Services
Centers for Disease Control and Prevention

Dadka qaba jirrooyinka sahlan/yaryar, sida hargabka, waxaa laga yaabaa in la tallaalo. Dadka uu xanuunkoodu yahay heer dhexaad ama kuwa ay xaaladoodu aad usii daran tahay waxaa loo baahan yahay inay sii sugaan ilaa inta ay kasoo bogsanayaan kahor inta ayna qaadanin xadiga tallaalka caadiga ah ee JYNNEOS™. **Haddii lagugula taliyey inaad qaadatid tallaalka JYNNEOS™ taasoo ay keentay kadib markii aad la kulantay fayraska busbuska daanyeerka, waxaa lagaaga baahan yahay in lagu tallaalo iyadoo aan waxba fiiro gaar ah loo yeelanaynin jirrooyinka wada-socda, uurka, naas-nuujinta, ama habdhiska difaaca oo daciifa.**

Tallaalka JYNNEOS™ waxaa laga yaabaa in si caadi ah loo bixiyo iyadoo aan loo eegin waqtiyada la qaato tallaalada kale. Haddana sidaasoo ay tahay, waxaa jira dad gaar oo la kulmay khatar dheeraad ah oo xaalad lagu magacaabo myocarditis (bararka muruqa wadnaha), taasoo ay ku jiraan dhallinyarada ama ragga qaangaarka ah, ayaa laga yaabaa inay sugaan ilaa 4 todobaad kadib qaadashada tallaalka JYNNEOS™ kahor inta ayna qaadanin tallaalada loo qaato cudurka COVID-19. **Haddii lagugula taliyey inaad qaadatid tallaalka JYNNEOS™ taasoo ay keentay kadib markii aad la kulantay fayraska furuqa daanyeerka, waxaa lagaaga baahan yahay inaad is-talaashid xataa haddii aad waqti dhow qaadatay tallaalka cudurka COVID-19.**

## 4. Halisaha khatarta la xiriira dareen-celinta tallaalka

- Guduud ama casaan, xanuun, barar, iyo cuncun goobta qofka laga tallaalay ayaa ah waxyaabaha ugu badan ee dhaca kadib marka uu qofku qaato tallaalka loo yaqaan JYNNEOS™.
- Daal (tabcaan), madaxanuun, murqo xanuun ayaa sidoo kale mararka qaar dhici kara kadib qaadashada tallaalka JYNNEOS™.

Dadka ayaa mararka qaarkood miyir beela kadib marka hawlgal-caafimaad lagu sameeyo, taasoo ay tallaalkuna ka mid tahay. U sheeg bixiyahaaga haddii aad dareento wareer, ama isbaddal ku yimaadda aragtidaada ama inay dheguhu ku guuxaan ama ku shanqaraan.

Sida dawo walba ee kale, waxaa jira fursad suurtagalkeedu aad u yar yahay in uu tallaal sababo dareen-celin xasaasiyad ah oo daran, dhaawacyo kale oo halis ah, ama dhimasho.

Waxaad awoodi kartaa inaad iska diiwaan-gelisid nidaamka loo yaqaan V-safe kadib marka aad qaadatid xaddi ka mid ah tallaalka loo yaqaan JYNNEOS™ adigoo adeegsanaya telefoonkaaga casriga ah kadibna galaya barta ciwaankeedu yahay **vsafe.cdc.gov**. V-safe waa nidaam lagula socdo badbaadada kaasi oo kuu oggolaanaya inaad la wadaagto CDC sida adiga, ama cidda aad masuulka ka tahay, aad dareemayso kadib qaadashada tallaalka JYNNEOS™. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo **www.cdc.gov/vsafe**.

## 5. Maxaa dhacaya haddii ay jirto dhibaato halis ah?

Dareen-celin xasaasiyadeed ayaa dhici karta kadib marka qofka la tallaalay ka tago rugta caafimaadka. Haddii aad aragto calaamado dareen-celin xasaasiyadeed ah oo daran (firiiric, wajiga oo bararsan iyo cuno/dhuun barar, neefsashada oo adkaata, wadnaha oo degdeg u garaacma, wareer, iyo tabbar darri), fadlan wac lanbarka **9-1-1** kadibna qofka gaarsii isbitaalka kuugu dhow.

Wixii calaamado kale ah kuwaasoo kuu keeni kara welwel, fadlan wac bixiyahaaga qaabbilsan daryeelka caafimaadka.

Dareen-celinta halista ah waa in loo sheegaa nidaamka qaabbilsan dareen-celinta halista ah ee lagu magacaaabo Vaccine Adverse Event Reporting System (Nidaamka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka) (VAERS). Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa badanaa gudbin doona warbixintan, ama adiga laftaada ayaa sidaa sameyn kara. Booqo barta VAERS ee ciwaankeedu yahay **www.vaers.hhs.gov** ama wac **1-800-822-7967**. *VAERS waxaa loogu talo-galey oo kaliya wargelinta dareen-celinta, isla mar ahaantaana xubnaha shaqaalaha ee VAERS awood uma laha inay bixiyaan talo caafimaad.*

## 6. Barnaamijka Tallaabooyinka Kahortagga Dhaawaca

Barnaamijka Tallaabooyinka Kahortagga Dhaawacu (Countermeasures Injury Compensation Program) waa barnaamij heer federaal kaasoo kaa gacan-siin kara inaad iska bixisid kharashyada ku baxa daryeelka caafimaadka iyo kharashyada kale ee gaarka ah ee ku baxa dadka uusoo gaaray dhaawac khatar ah kaasoo ka dhashay daawooyin ama tallaalo gaar ah. Haddii uu dhaawac kaasoo gaaray tallaalka busbuska/furuqa daanyeerka, waxaad awoodi kartaa inaad xog dheeraad ah ka ogaatid Barnaamijkan adigoo booqanaya barta uu iska leeyahay barnaamijku ee ciwaankeedu yahay **www.hrsa.gov/cicp**, ama adigoo soo wacaya lanbarka **1-855-266-2427 (855-266-CICP)**.

## 7. Sideen wax badan u ogaan karaa?

- Waydii bixiyaha qaabbilsan daryeelkaaga caafimaadka.
- Wac waaxda qaabbilsan caafimaadka ee deegaankaaga ama gobolkaaga.
- Booqo barta laanta qaabbilsan Maareynta Cuntada iyio Daawooyinka ee FDA si aad u heshid xirmooyinka tallaalka iyo macluumaad dheeraad ah taasoo uu ciwaankeedu yahay **www.fda.gov/vaccines-blood-biologics/vaccines**.
- La xiriir Xarumaha Xakameynta iyo Ka-hortagga Cudurada (Centers for Disease Control and Prevention, CDC):
  - Wac lanbarka **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)** ama
  - Booqo barta Xarumaha Xakameynta iyo Ka-hortagga Cudurada ee CDC taasoo ciwaankeedu yahay **www.cdc.gov/poxvirus/monkeypox**.

Somali translation provided by Immunize.org